



*Tiirarka
Baadi Goobkeena*



RAADINTA HABFAKAR

RAADINTA HABFAKAR



TIIRARKA BAADI GOOBKEENA

Soo Banbixinta Eexashadeena:

Koox ahaaan waa lagama maarmaan wax waydiinta si aan u soo banbixino eexashadeena qof ahaaneed iyo si aan u awoodno wax u aragno siday wax noola muuqdaan aragti ahaan una qaadano aragtiyada dadka kale. Tani waxay noo ogolaaneysaa inaan is taageerno — oo aan si geesinimo leh u wada fiicanaano.

Ka Raadi Goobo Aan La Filayn

Markii aan martiqaadayno xubin cusub inuu ku soo biiro qoyskeena, waa inaan ballaarinnaa raadinteena. Waa inaan hubinno in wicideenu soo jabaq celiyo buur kasta, doox walba, dhul la yaqaan iyo midaan la aqoon. In ay ku qoob-ciyaarto dhegaha kuwa wax raadinaya iyo kuwa aan weli tixgelin in la raadiyo.

Waydii Waydiimo iftiimin leh


Waxaan nahay urur baadigoobeyaal ah - waxaana ku midaysan nahay rabitaankeenna ah inaan ka helno bani-aadminimo qayb kasta oo ka mid ah shaqadeena iyo adduunkeenna. Si loo sii daayo barwaaqada ee ku qarsoon qaab dhismeedka wareysiga, waa inaan weydiinno su'aalo gaara qofka qalbigiisa. Su'aalaha u adeega sida marinadda isku xirka iyo xaqiiqada.

Tusaale u noqo waxaan Qiimayno

Anagoo dibada uga eegayna aayatiin cusub oo qeexan hay'adeena, waa lagama maarmaan in sidoo kale gudaha dib isu eego. Si aan nafteena ugu abuurno qiyamka, caqiidooyinka, iyo ujeeddada gudaha asaaskeena — oo aan u oggolaanno inay noqdaan xoogga wada ee mideeya bulshadeenna caalimaga ah.



Sharaf



RAADINTA HABFAKAR

RAADINTA HABFAKAR



SHARAF

Ku bilow goor walba raadinta adigoo maanka ku haya in qofka aad la hadlayso inuu xaq u leeyahay inuu halkan joogo. Sharaftooda waa inay marwalba ahaato muhimada koowaad.

KA BILAABIDA SHARAFTA:


Miyaan u abuurayaa goob
soo dhaweyn leh dadka kale
oo buuxiya baahiyadooda
iyo raaxadooda?

Miyaan ula dhaqmaa dadka
aan la shaqeeyo, macaamiisha
iyo shuraakada si daryeel iyo
qadarin ku dheehan?

Miyaan abuurayaa
deegaan/meel sharfta,
aqoonsata, iyo u dabaaldagta
bani'aadanimada dadka kale?



Karti



RAADINTA HABFAKAR

RAADINTA HABFAKAR

KARTI

*Markaan raadinayno, waxaa raadinaa karti.
Waxaan isku dayeynaa inaan fahano sida
ay dadka u rabaan inay u horumaraan oo
waxaan ka shaqeynaa inaan helno siyaabo
aan ku caawino inay horumaraan.*

AQOONSASHADA KARTIDA:

Miyaan tixgalinayaa dadka
horey la iska indhotiray in la
siiyo fursado?

Miyaan dadka kale siinayaa
goob ay ku sahamiyaan,
ku horumaraan, iyo meel
ku gaaraan?

Miyaan isku dayeyaa inaan
horumariyo dadka kale,
isla markaana naftayda
u horumariyaa?



*Wada Abuurka
(askun)*



RAADINTA HABFAKAR

RAADINTA HABFAKAR



WADA ABUURKA (ASKUN)

*Hal waddo oo lagu dareensiiyo dadka
inay dareemaan inay gurigooda joogaan
waa in wax lala hal buuro. Qayb ka mid
ah horumarka waa in lagu dareemo raaxo
wax la dhisida dadka kale. Siidaynta
waxay ku bilaabantaa geesnimada
ah in la noqdo hal abuur.*

DHIIRIGELINTA WADA ABUURIDA:

Miyaan bixiyaa fursado
halabuurnimo, soo celcelinta,
iyo lahaansho la wadaago?

Miyaan soo dhaweynayaa/
oggolaanayaa nugaylka inaan
u furo goob dadka kale inay
wax ila abuuraan?

Miyaan u oggolaanayaa
nafteyda wakhti aan ku sahmiyo
hal abuurkeyga?



Caad la'aan



RAADINTA HABFAKAR

RAADINTA HABFAKAR



CAAD LA'AAN

Shaqadda Samafalka waa inay ka jirtaa runsheeg waxyaalaha aan qabanayno. Laga bilaabo howsha socota, ilaa iyo istiraatiijiyadda hay'adda, waxaa lagama maarmaan ah in la yeesho aragtida sida aaladu u shaqeyso.

BANDHIGA RUNSHEEG:

Miyaan ku wargeliyaa dadka afka ay doorbidayaan?

Miyaan si hufan oo run ku dheehan uga hadlaa caqabadaha ay dadku kala kulmi doonaan shaqadan?

Miyaan bixinayaa wadooyin badan oo dadku ku sahamiyaan oo ay ku gaaraan fahan ama aragti buuxda?



Xiriirka



RAADINTA HABFAKAR

RAADINTA HABFAKAR



XIRIIRKA

*Samaynta xiriirin dhab/run ah waxay dhacdaa
markaan sameyno tallaabooyin dheeraad ah.*

*Markaan la kulano qof, waan dhageysanaa
si aan u maqalno runtooda oo aan soo
dhaweynaa/oggolaanaa fursadaheena
ah sameynta xiriir.*

SHARFIDA XIRIIRO QOTO DHEER:


Miyaan ka qaybqaataa isdhexgal
si run ah, oo naftaydoo idil
ku soo xiraa wadahadalka?

Miyaan kula kulmayaa qofka halka
uu fikrad ahaan taagan yahay?

Miyaan dadka kale u furaa
albaabada si ay u qeexaan
murugada, farxad, iyo qosol?



Ka mid ahaanta



RAADINTA HABFAKAR

RAADINTA HABFAKAR



KA MID AHAANTA

*Ka mid ahaanta waa wadnaha ama ubu'da
himilooyinkeena. Haddii aysan jirin dareen
ka mid ahaansho oo dhab/run ah qoyska
Alight uma wajihi karno shaqadeena iyo hal
abuurideena dareen farxad geesinimo leh.*

BALAN QAADIDA KA MID AHAANSHO:


Miyaan ka qaadanayaa qaybta
doorkayga ee ah hubinta in
dadka kale ay dareemaan ka mid
ahaansho?

Miyaan si firfircoon u keenayaa
dadka kale oo abuurayaa fursado
aan xuduud lahayn oo wax wada
abuurid ah?

Miyaan kaga hortagayaa
cunsuranimada iyo takoorida
kale ficilkeyga?



Kaarkaaga



RAADINTA HABFAKAR

RAADINTA HABFAKAR



KAARKAAGA

WAXA AAN WEYDIINAYO:
